THE CITY OF COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR

Franklin County
BOARD OF COMMISSIONERS
1803

# Ka-soo Kabsashada dhaqaale, Jawaab Celinta Ganacsatada yar-yar ee Columbus-Franklin County COVID-19

Ka-soo Kabashada dhaqaale, Jawaab Celinta Ganacsatada yar-yar ee Columbus Franklin County COVID-19 oo u ugu deeqayso ganacsatada yar-yar uu saameeye caabuqa Covid-19 dhaale bilaash ah iyo deen uu dulsaarkeedu uu hooseeyo.

## Barnaamijkan hadafkiisu waa inuu gar gaar siiyo ganacsatada yar-yar si ay ooga helaan caawinaad:

- Ka-baxaan dhibaatada, sii socod sii hawsha iyo shaqaalaha;
- Dib-U tababaraan shaqaalaha;
- Dhib la'aan ku laabo ganacsigaada si aad ugu adeegto macaamiisha; isla markaana
- Ka' faa ideyso fursadan oo kor u qaadayso ganacsiga

## Dhaqaalaha la bixinayo wuxuu isugu jiraa sadax qeeyb:

- **Gar-gaar Dhaqaale:** – Dhaqaale lagu caawinayo ganacsatada yar-yar oo ay ku jiraan shirkadaha ka dhax shaqeeya meelaha Dakhliga Hoose iyo Dhexe ee magaaladan Columbus, oona loo fidinayo lacago bilaash ah iyo kuwo deen, taas oona hadaf keedu yahay in ganacsigaas uusan ka bixin suuqa. Waxaa ka loo xaq u leh gargaarkan ganacsatada ka baxsan magaalada Columbus balse hoos taga degmada Franklin, Dhamaan ganacsatada leh shirkadaha dan yarta oo sameeya dhaqaale yar, dhexe.
- **Caawinad Lagu soo iibsado Qalab Looga hortago Cudurada (PPE)**– In loo baxsho ganacsatada yar-yar lacago ay ku iibsadaan qalabka looga hortago cudurda iyo/ama hawlaha kaloo la xariira ka hortaga caabuqa COVID-19/ waxyaabaha kale ee magaaladda columbus ku amartay sameentooda marka goobaha shaqo dib loo furo si loo badbaado. Gargaarkan wuxuu kaloo u furanyahy ganacsatada ka baxsan magaalada Columbus balse soo hoosgala degmada Franklin.
- **Gar-gaar Qalab iyo Tababar -** U bixin tababar hor'udhac iyo mid dambe ku saabsan buuxinta iyo farsamooyinka isticmaalka aaladaha lagu buuxsado dhaqaalaha tabarucaada iyo deemanka oo loogu talagalay, shirkadaha Columbus iyo nawaaxigeeda si ay usii wataan hawshoda una soo qortaan shaqaale.

## Qaabka loo Buuxsado

- Buuxitaanka wuxuu furmi doonaa bisha Lexaad Juun 9, 2020, 5 p.m. ET. Codsiyada waxaa loo aqbali doonaa si ku-meelgaar ah ilaa bilowga ganacsigu ku eg yahay Julaayo 17, 2020 ama taariikhda maalgelinta la dhammeeyo.
- Mulkiileyaasha ganacsigu waxaa lagu hagi doonaa Ururrada Taageerada Ganacsatada iyo Bixiyeyaasha Caawinaada Farsamo ee ugu dhaw si ay u dhammaystiraan oo ay u soo gudbistaan codsiga buuxinta. Ka bilow hawsha arjiga buuxinta halkan

Halkaan ka baro in badan: [https://bit.ly/ CBUSRecoveryFund](https://bit.ly/CBUSRecoveryFund)

## Hay'ado kaloo laguu gudbiyo ka qeeb ah caawinta oo kuu dhaw

## Hay'addaha Caawiya Ganacsatda iyo bixiyayaasha caawinaada farsamo

Columbus Urban League
Ohio Small Business Development Centers
Columbus Chamber of Commerce
Ohio Minority Supplier Development Council
RL Underwood & Associates
YMT consultants — Your Business. Inspired.
WBC — Women's Business Center of Central Ohio
Franklinton Board of Trade — Advocate. Beautify. Connect.
LSBA — Long Street Businessmen's Association, Inc.
Greater Linden Business Network
Mt. Vernon Area District Improvement Association, Inc.
Hilltop Business Association
Columbus Empowerment Corporation
Parsons Area Merchants Association

## Funding & Advocacy Partners

The City of Columbus — Andrew J. Ginther, Mayor
Franklin County Board of Commissioners
JPMorgan Chase & Co.
rev1 ventures
Finance Fund — partner • invest • grow
next street
ECDI — Invest Educate Innovate

## Qaabka Codsiyada loo qiimeeyo

- Shirkadaha isugu jira Ururada Taageerada Ganacsatada ayaa xaqiijin doonta in codsiyada lasoo gudbiyay oo dhan
- ay dhameystiran yihiin taas oo lala kaashanayo mulkiilaha ganacsiga.
- Guddiga dib u eegista ayaa dib u eegi doona codsiyada, iyagoo mudnaanta hore siindoona ganacsiyada:
- U-muuqada inay si adak fursad weyn u haystaan inay sii wadaan hawlsocodkooda marka laga baxo caabuqa
- COVID-19 oona awooda inay soo saaraan faa'idooyin islamarkaana sii hayn kara shaqaalahooda

  Qeexay kana warbixiye isticmaalka maaliyada dhaqaale la mid'ah

## Dulmarka Barnaamikja Maaliyadeed iyo Sharruudaha

| | Gargaarka Dhaqaale ee soo-kabashada | Deeqaha ay ganacsata yar-yar kugu laabtaan si amaan ah (ka hortaga caabuqa) | Amaahda Yasiran |
|---|---|---|---|
| **Ujeedada** | • U bixinta gargaar maaliyadeed ganacsiyada yaryar, ee wax soo saarkooda Hooseeya iyo Dhex-dhexaadka ah ee Magaalada, ama loogu talagalay milkiileyaasha ganacsiyadaas oo kale ee ka baxsan Magaalada dhexdeeda balse hoos taga degmada Franklin gudaheeda.<br>• Kaalmo deeq ah oo gacan ka geysata sidii loo sii wadi lahaa hawsha ganacsi inta lagu jiro masiibada COVID-19<br>• Haddafka waa joogteynta ganacsiga hore u dhisnaa iyo sii waddida shaqoonyinka | • U fidinta gacanacsata yar-yar ee Columbus ka hawl gasha iyo degmada Franklin gargaar dhaqaale eey ku iibsadaan qalabka looga hortago cudurada.<br>• Isla markaana lagu taageero waxa yaabaha kale oo ku saabsan ka hortaga COVID-19 si goobaha ganacsi dib loogu furo macaamiisha iyo shaqaalaha. | In loo fidiyo deen dulsaarkeedu hooseeyo ganacsiyada yaryar, ee wax soo saarkooda Hooseeya iyo Dhex-dhexaadka ah ee Magaalada, ama milkiileyaasha ganacsiyadaas oo kale ee ka baxsan Magaalada dhexdeeda balse hoos taga degmada Franklin gudaheeda. Gargaar kan maaliyadeed aye ganacsatada u isticmaali karaan ina ku sii balaariyaan ganacsikooda ama ay ku soo daraan adeegyo kaloo gacan ka geesta hormarka ganacsiga. Saddex bilood kadib deemanka waa loo cafin karaa ganacsatada hadii ay u isticmaaleen qaabki looga baahnaa. |
| **Yaa mudan?** | • Ganacsiyada ka hawl gala xaafadaha nawaaxiga Columbus, ama mulkiilayaasha ganacsiga hoose, dhaxe ee ka baxsan Magaalada dhexdeeda balse hoos taga degmadaFranklin. (ka eeg khariidadda)<br>• <25 shaqaale, door bitista ayaa la siiyaa <5 Shaqaale<br>• Iibsashad oo yaraatay laga soo bilaabo bishi 17 da maarso 2020 (>25%) sababo la xariira COVID-19 awgeed | • Ganacsiyada ka hawlgala gudaha xuduudaha degmada Columbus ama gudaha degmada Franklin.<br>• <25 shaqaale | • Ganacsiga hoose dhexe ee ka haw gala xaafada nawaaxiga Columbus ama gudaha degmada Franklin<br>• <25 shaqaale, door bitista ayaa la siioyaa <Shaqaale<br>* Haddii ganacsigaadu ku yaalo meel ka baxsan Magaalada Columbus laakiin ka tirsan degmada Franklin, oo aad rabto amaah maal gashi, waxaad si toos ula xiriiri kartaa Machadka horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada ee https://www.ecdi.org/invest/loan-program |
| **Maalgalinta ganacsi walba** | • Deeqda waxay gaari kartaa ilaa $10,000<br>• Go'aanka lacakta waxaa laga qaadan doonaa arjiga la soo buuxshay | • Deeq gaareysa ilaa $5,000 laguugu celinayo qarshi kaaga baxay iibsiga qalabka ka hortaga COVID-19 ka soo bilaabato 17 maarso 2020, waa hadii gacansigaadu mutnaan u yeesho<br>• Go'aanka lacakta waxaa laga qaadan doonaa arjiga la soo buuxshay | • Amaahda ugu badan ee boqolkiiba 50% maalgashiga mashruuca ama balaarinta ganacsiga / Fursado ilaa cadad $20,000 (hadbo midki yar)<br>• Dulsaar hooseeya, lagu soo koobay 1%<br>• Go'aanka lacakta waxaa laga qaadan doonaa arjiga la soo buuxshay |
| **Sharuuda loo baahanyahay?** | Canshuur celiska ganacsiga oo saxeexan si loo xaqiijiyo dakhliga sannadlaha ah<br>• canshuu celiska shaqsiga oo saxiixan si loo xaqiijiyo daqliga shaqsiyeed<br>*Arjiga la soo buuxiyay oo dhamaystiran oo ay ku jiraan:*<br>• Macluumaadka assaasiga ee ganacsiga<br>• Qeexitaan ku saabsan sida caabuqa COVID-19 u saameeye ganacsigan (Ay kujirto Faa'idada)<br>• Qorshaha soo kabashada ee lagu abaarayo caabuqa<br>• Miisaaniyadda isticmaalka lacagaha<br>• Xaqiijinta in ganacsigu uu helay maalgalinta qalabka ka hortaga caabuqa ama maalgalinta EIDL<br>*Hadii la maalgalshay:*<br>• Ganacsigu waxaa ku waajib ah inuu ka qeebgalo barnaamijka caawimaada farsamo<br>• Ganacsigu waa inuu bixiyaa warbixin hal-bog ah oo sanadle ah | • Rasiiddaha taariikhda 17ka maarso ama wixii ka dambeeye oo cadeen u noqda in ganacsigu qarash kaga baxay iibsashada qalabka ka hortaga caabuqa COVID-19<br>• Xaqiijinta in ganacsigu uu helay maalgalinta qalabka ka hortaga caabuqa ama maalgalinta EIDL<br>*If funded:*<br>• Ganacsigu waa inuu bixiyaa warbixin hal-bog ah oo sanadle ah | Canshuur celiska ganacsiga oo saxeexan si loo xaqiijiyo dakhliga sannadlaha ah<br>• canshuu celiska shaqsiga oo saxiixan si loo xaqiijiyo daqliga shaqsiyeed<br>*Arjiga la soo buuxiyay oo dhamaystiran oo ay ku jiraan:*<br>• Macluumaadka assaasiga ee ganacsiga<br>• Qeexitaan ku saabsan sida caabuqa COVID-19 u saameeye ganacsigan (Ay kujirto Faa'idada)<br>• Qorshaha soo kabashada ee lagu abaarayo COVID-19<br>• Miisaaniyadda isticmaalka lacagaha<br>• Xaqiijinta in ganacsigu uu helay maalgalinta qalabka ka hortaga caabuqa ama maalgalinta EIDL<br>*Hadii la maalgalshay:*<br>• Ganacsigu waxaa ku waajib ah inuu ka qeebgalo barnaamijka caawimaada farsamo<br>• Ganacsigu waa inuu bixiyaa warbixin hal-bog ah oo sanadle ah |

## Gudiga dib u eega codsiga

Finance Fund — partner · invest · grow

rev1ventures

United Midwest Savings Bank

ECDI — Invest · Educate · Innovate

The City of Columbus — Andrew J. Ginther, Mayor

Franklin County Board of Commissioners 1803

## Su'aalaha Barnaamijka

*Sidee baan u buuxsadaa?*

Mulkiileyaasha ganacsigu waxaa lagu hagi doonaa Ururrada Taageerada Ganacsatada iyo Bixiyeyaasha Caawinta Farsamo si loo buuxiyo loona soo gudbiyo arjiga. Ka bilow hawsha arjiga halkan (here).

*Imisa ayaa lagu bilaaway maalgalinta barnaamijkan?*

Isku-darka maalgelinta ee barnaamijkan waa $ 7.75M, oo loo qeebin doono seddexda qeeb- Deeqaha Soo-kabashada, Deeqaha Ganacsiga Yar lagu maalgalsho iibsashada qalabka ka hortaga caabuqa si ganacsigu dib loogu furo iyo Amaah dulsaarkeedu hooseeyo

*Ganacsadu ma buuxsan karaa barnaamijyo badan?*

Haa.

*Dhammaan ganacsiyadu kala duduwan miyee u qalmaan barnaamijkan?*

Maya. Ganacsatada Khamaarka iyo khamriga, xarumaha madadaalada dadka waaweyn, ama ganacsiyada kale ee la midka ah uma qalmaan barnaamijkaan. Haddii aad rajeenayso inaad buuxsato oo aadan hubin in ganacsigaadu u qalmi doono, fadlan soo gudbi haybin adigoo adeegsanayo bogan website here.

*Waa kuma qofka ugu horeeya lagala xirriir karo su'aalo ku wajanhan barnaamijkan?*

Columbus-Franklin County COVID-19 Websaydhka Maalgelinta Soo-kabashada Ganacsiga Yar yar (oo aad kala xiriiri karto halkaan here). waa barta xiriirka ee dhammaan su'aalaha la xiriira barnaamijka. Haddii milkiilayaasha ganacsigu daneynayaan inay soo buuxsadaan, waa inay ku soo gudbiyaan foomka weydiimaha websaydhka Hel Matched si loogu hago caawin bixiyayaasha ESO. Oo ka caawin doona ka jawaabidda su'aalaha la xiriira u-qalmanaanta iyo nidaamka dalbashada.

*Waxaan lacag ka helay barnaamijyada gargaarka ee COVID-19 federaaliga ah (PPP ama EIDL) balse daqligaas kuma filna inuu daboolow baahiyaha ganacsigeyga. Wali ma dalban karaa maalgalinta mid ka mid ah barnaamijyadan?*

Haa - barnaamijyadan waxaa heli kara milkiilayaasha ganacsiga ee helay kaalmada federaalka.

Haddii ganacsigaagu ku yaallo meel ka baxsan Magaalada Columbus, laakiin ka tirsan degmada Franklin, xaq uma lihid haddii aad ka heshay kaalmada federaaliga ah nooca barnaamijka 'PPP' ama 'EIDL'.

*Ma jiraa agab daawacan kana faaloonayo gargaarka maalgalinta?*

Haa, waxaad ka soo degsan kartaa qoraalkaas PDF ahaan bogga Ka-soo Kabasahada dhaqaale, Jawaab Celinta Ganacsatada yar-yar ee Columbus-Franklin County COVID-19 (laga heli karo halkan here)

*Wabseydkan ee gargaarka dhaqaale maka dhex booqan karaa moobelka?*

Haa. Waad booqan kartaa Bogga Ka-soo Kabasahada dhaqaale, Jawaab Celinta Ganacsatada yar-yar ee Columbus-Franklin County COVID-19 adigoo adeegsanayo moobilkada (laga heli karo halkan here

*Marka ganacsigaygu loo gudbiyo caawin bixiyayaasha, imisa aye igu qaadan doontaa inaan helo gargaarka dhaqaale?*

Saadaalinta waa marka barnaamijku furmayo, waxaan higsaneynaa in lacagaha ugu horreeya la kala diro 30-ka Juun. Taariikhdaas ka dib, waxaan higsaneynaa inaan u fidino maalgalin codsadayaasha 2da toddobaadba mar, iyadoo bixinta ugu dambeysa ay tahay 2 toddobaad kadib dhammaadka muddada barnaamijka.

*Haddii ganacsigu uusan u qalmin deeqaha, ma jiraan ilo kale ama tixraac loo sameyn doono ganacsigaas si loogu caawiyo?*

Ujeedadaynu waa inaan caawinno ganacsatada xilligan dhibka lagu jiro. Haddii ganacsiyada aan laga maalgelin barnaamijka, ganacsigu waa inuu sii wadaa xiriirka uu la leeyahay bixiyaha ESO, kaasoo awood u leh inuu usii fidiyo kaalmada farsamada arrimaha guud ee hawlgalka. Intaa waxaa sii dheer, waxaa jira ilo kaloo tilmaamaya caawinaado oo laga helikaro boga Ka-soo Kabasahada dhaqaale, Jawaab Celinta Ganacsatada yar-yar ee Columbus-Franklin County COVID-19 (laga heli karo halkan here.)

*Ma waxaa jiri doona khariirad lagu qeexo degmooyinka ganacastada hoose dhex si lagu xaqiijiyo u-qalmitaanka?*

Tiknolojiyadda Magaalada Columbus waxay diyaarisay khariidad muujineysa goobaha ganacsiga hoose dhexe oo uqalma ee Magaalada. Qalabkani wuxuu kuu oggolaanayaa inaad geliso cinwaan ama eegto khariidadaas si aad u xaqiijiso goobtaada inay tahay a) Magaalada Columbus iyo b) aagga u-habboon gargaarka. Halkaan ka eeg khariiradaas here

*Dhawaanahan goobaha ganacsi waxaa soo gaaray khasaaro ka dhasahay banaan baxyada kasocdo wadanka oo dhan, miyaa gargaanrkan dhaqaale la sii balaarindoona sababhasaas awgeed?*

Haatan maya. Ganacsadayaasha waa inay si gaar ah u raadsadaan kaalmo si ay u helaan barnaamijka kasoo kabashada COVID-19 oo loogu talagalay ganacsatada wax soo saarkoodo hooseeyo ama dhaxdhaxaad ah

*Milkiilayaasha ganacsiga ee danbiyo culus hore u geestay ma ka qeyb qaadan kara barnaamijkan?*

Haa.

*Ganacsiyada leh waajibaadyo lacakeed ay Magaalada Columbus ku leedahay sida? (canshuurta, ganaaxyada iyo / ama khidmadaha) miyee u-qalmaan barnaamijkan*

Maya - barnaamijku wuxuu gargaar maalgelin u fidin doonaa kaliya ganacsiyada aan lahayn waajibaado lacageed oo looga leeyahay magaalada Columbus

*Ka waran haddii ganacsigu ku jiro haatan qorshe lacag bixin ah ee cashuuraat hore loogu yeeshay?*

Haa, ganacsigaasu wuu u-qalmaa waa haddi uu **deemaha lagu leeyahy uu si toos ah u bixinayo** lacagaha looga leeyahay magaalada Columbus ama degmada Franklin midkood. Ganacsiguna waxaa laga doonaa inuu la yimaado cadeemo lagu xaqiijiyo bixinta waajibaadka lacagahaas.

*Deenta Columbus kaliya miyaa ganacsigu ka hor istaaigi doonta u-qalmitaanka barnaamijka maal galinta misa waxaa la mid ah amahda degmada Farnkalin iyo tan gobalka Ohio? (Tusaale, Canshuurta hantida, deenta ganacsiga ee gobalka)*

Deenta ka timid Magaalada Columbus aan wali dib loo bixin kaliya ayaa ganacsiga ka hor istaagi karta ka qeeybgalka barnaamijka maalgalinta. Deemanka kale ka yimaada gobalka, degmada ama faderaalka ma xayiri doonaan ganacsiga. Balse sida kor lagu soo xusay ganacsigu waa inuu amaahda degmada bixinayo

*Ku xadgudubka sharciyada miyee ganacsigu u diidaan u-qalmitaanka?*

Haa. Ganacsiyada ku lug leh xadgudub sharci **oo markaa taagan** Umaqalmaan barnaamijka. Magaalada ayaa ka ma'suul ah inay soo bandhigto dhamaan xadgudbayaasha taagan. Waxaa intaa sii dheer ganacsadayaasha lagu soo dacweeyay inaysan u hogaansamin amarada caafimaadka bulshada ee COVID-19 ayagana umaqalmaan

*Hantileyda milkiileyaasha ahi ma u qalmaan?*

Haa

*Xarumaha faa'ido doonka ahayn ma codsankaraan?*

Maya, barnaamijyadeenna ayaa si gaar ah loogu talagalay inay ku taageeraan ganacsiyada macaashka sameeya.

*Ganacsi faa'ido doona ah oo uu milkiyo xarun samafal maa buux san karaa?*

Haa ganacsigaas wuu u qalmaa, waa hadii uu kasoo baxo dhamaan sharuudaha. Buuxintana waa in loo soo maraa dhanka ganacsiga sameeya macaashka, aan xarunta sama falka aysan codsanin

*Sidee iyo goormee aan codsan karaa?*

Barnaamika Ka-soo Kabashada dhaqaale, Jawaab Celinta Ganacsatada yar-yar ee Columbus-Franklin County COVID-19 wuxuu furmi doonaa taarikhda 9ka Juun, 2020 saacada 5 p.m. wakhtiga bari. Codsiyada waxaa loo aqbali doona si isu-xig

## Su'aalaha U-qalmitaanka iyo Sharuudaha

### *Barnaamijka deeqah soo kabashada gacansiyada yar-yar*

***Ganacsigaygu ma u qalmaa?***

Si uu ugu qalmo, ganacsigu waa inuu:

- Ku yaalaa deegaanda loo aqoonsanyhay in dhaqaalahooda hooseeyo ama dhexdhaxaad ah ee kudaha magaalada Columbus (wabseydka aad ka hubsato in ganacsigaadu katirsanyahy goobaha loogu talagalay waa laguu bixin doona)*
- Ganacsigu yahya faaido doon
- Aan lahayn waajibaadyo lacageed (Canshuur,ganaax iyo/ama khidmo) oo looga leeyahay Magaalada Columbus ama Franklin County
- Aan ganacsigu lahayn in kabadan 25 shaqaale dhamaan gooobahooda shaqo
- Muuji inay luntay ugu yaraan boqolkiiba 25 dakhliga ganacsiga tan iyo markii la soo saaray amarkii ahaa "Guri jooga"

***Deeqahan lacageed maxaa u isticmaali karaa?***

Deeqda ayaa loo adeegsan karaa mushahar bixinta, kharashaadka hawlgalka, kireynta ama bixinta kirada iyo iibka alaabada lama huraanka u ah ganacsiga. Lacagaha looma isticmaali karo hagaajinta raasumaal ama kharashaadka shaqsi ahaaneed

***Habka loo ansaxiyo codsashada deeqda miyey ku lug leedahay in lasoo hubiyo rikootkaada ama shuruudaha dammaanadda shaqsiyeed?***

Maya.

***Sideen ku caddeyn karaa in aan lumiyey ugu yaraan boqolkiiba 25dakhliga tan iyo markii Amarka guri jooga la dhaqangalshay?***

Tan waxaa lagu muujin karaa sannad-dhaafka ama bildhaaka-dhaafka marka lala barbar dhigo dakhliga bisha Abriil 2020.

***Waraaqo noocee ah ayaan u baahanahay inaan kusoo daro gudbinta codsigeyga?***

- Cashuur celinta ganacsiga ee ugu dambeysay ee la heli karo
- Canshuur celinta shaqsiyeedka ee ugu dambeysay ee la heli karo

* Haddii ganacsigaada kabax sanyahay magaalada Columbu, laakin ka tirsan xuduuda dagmada Franklin ganacsigaas waa u qalmaa haddii milkiiluhu uqalmo in lagu tiriyo dhaqaale soo saar hooseeyo ama dhaxdhexaad ka kuna kooban 25 shaqaale.

### *Deeqah Ganacsiga yar-yar ay si amaan ah ugu soo laabtaan (Maalgalin qalabka ka-hortaga)*

***Ganacsigaygu ma u qalmaa?***

Si uu ugu qalmo, ganacsigu waa inuu:

- Ku yaalaa deegaanda loo aqoonsanyhay in dhaqaalahooda hooseeyo ama dhexdhaxaad ah ee kudaha magaalada Columbus (wabseydka aad ka hubsato in ganacsigaadu katirsanyahy goobaha loogu talagalay waa laguu bixin doona)*
- Ganacsigu yahya faaido doon
- Aan lahayn waajibaadyo lacageed (Canshuur,ganaax iyo/ama khidmo) oo looga leeyahay Magaalada Columbus ama Franklin County

***Deeqahan lacageed maxaa u isticmaali karaa?***

Deeqda la qorsheeye waa in loo istcimaalaa in lagu sugo iibsashada waxyaabaha looga hortago cudurka COVID-19 si amaan ah ganacsigu dib loogu furo. Isticmaalka deeqahan waxaa uqalma sahayda qalabka ilaalinta shaqsiyadeed ee loogu talagalay shaqaalaha iyo macaamiisha (tusaale ahaan waji gashiga ama gaashaanka, galoofyada, gacmo nadiifiye) iyo sidoo kale wixii isbeddelo ah oo lagu sameeyo goobta shaqada si loogu hoggaansamo shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada ee looga hortago COVID-19 (tusaale, ilaalada firdhinta, xadida hindhisada. calamaadaha lugu raaco Kala fogaanshaha.) Tan waxaa ku jiri kara kharashyada shaqaalaha, illaa iyo inta ganacsiyadu muujin karaan shaqaale dheeri ah inay lagama maarmaan u yihiin inay u adeegaan meel ballaadhan oo jireed si ay u hoggaansamaan tilmaamaha leexinta (tusaale ahaan, ballaarinta hawlgallada baarkinka).

***Hawsha kharashgalintu ma tahay mid la ogolaan karo oo hoos imanaya barnaamijka Deeqda ee loogu talagalay soo laabashada abniga leh?***

Kaliya sida kor lagu soo sharxay.

***Deeqaha PPE (ka-hortaga cudurka) ma ceemin kaliyaa mise ganacsigu wuu codsan karaa cadad lacag uu ku iibsado PPE?***

Deeqahan waa lacag celin, marka waxaa loo baahan doonaa in la helo caddeyn iibsasho (tusaale ahaan, rasiid ama qaansheegad). Deeqda waxaa lagu bixin karaa iibsiyada horey loo sameeyey iyo / ama iibsiyadaha la sameyn doono mustaqbalka (illaa iyo inta la caddeyn karo iibsashada iyo qiimaha la bixiyay)

***Habka loo ansaxiyo codsashada deeqda miyey ku lug leedahay in lasoo hubiyo rikootkaada ama shuruudaha dammaanadda shaqsiyeed?***

Maya.

***Waraaqo noocee ah ayaan u baahanahay inaan ku soo daro gudbint arjigeyga??***

Fadlan soo gudbi rasiidhada iyo / ama qaan-sheegashada wixii dalab iibsasho ah oo lagu dalbaday qalabka looga hortago cudurka si loo taageero soo laabashada ganacasiga oo si amaan ah, ama haddii ay dhacdo kordhin shaqaale. Kharashaadka, diiwaangelinta mushaharka waqtiga loogu talagalay oo ay la socoto dukumiinti ku saabsan sida shaqaalaha loo adeegsaday inay ka caawiso meheradda inay u hoggaansamaan tilmaamaha kala hagitaanka goobta ganacsi.

## *Deemaha hormarinta*

*Ganacsigaygu ma u qalmaa?*

Si uu ugu qalmo, ganacsigu waa inuu:

- Ku yaalaa deegaanda loo aqoonsanyhay in dhaqaalahooda hooseeyo ama dhexdhaxaa ee kudaha magaalada Columbus (wabseydka aad ka hubsato in ganacsigaadu katirsanyahy goobaha loogu talagalay waa laguu bixin doona)*
- Ganacsigu yahya faaido doon
- Aan lahayn waajibaadyo lacageed (Canshuur,ganaax iyo/ama khidmo) oo looga leeyahay Magaalada Columbus ama Franklin County

* Haddii ganacsigaada kabax sanyahay magaalada Columbu, laakin ka tirsan xuduuda dagmada Franklin ganacsigaaduna u baahanyahy maalgalin fadlan wabseydkan booqo si aad u ogaato uqalmida iyo su'aalahada: https://www.ecdi.org/ small-business-loans/

*Deeqahan lacageed maxaa u isticmaali karaa?*

Amaahdan waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo ganacsiga si hal-abuur loo sameeyo maadaama caabuqa COVID -19 dhibaateeye hawlsocodka suuqa. Ganacsiga u qalmaa amaahdan wuxuu adeegsan karaa kor u qaadis ganacsi ama sii balaarin ganacsiga ama adeegyo kale si ganacsigaas suuqa ooga bixin. Islamarkana uu shaqooyin hor leh abuuri karo xatee uu maaligalin kale sameeysan karo si ganacsiga kor ugusii kaco

*Deymahaani ma yihiin kuwo la cafin karo?*

Amaahdan way uqaalntaa cafis laga bilaabo bisha seddexaad kadib bixinta qeyb kamid ah iyadoo loo tiiksan doona talooyinka ka soo baxay ESO oo ku saabsan hormarka uu ganacsigaas sameeye ESO. Astaamah laga eegi doona waxay isugu jiraan:

- Xaqiijin ku saabsan in amaahdi loo adeegsaday sida ku haboon ganacsiga
- In la dhamystiray ugu yaraan labo kulan uu ganacsigu la wadaagay caawiyaasha hore loogu hagay
- Qeexitaan tayo leh oo ku saabsan in ganacsigu hormar sameeye iyadoo la adeegsanayo lacagaha amaahda.

*Xasuusin: Haddii ganacsigaada kabax sanyahay magaalada Columbus, laakin ka tirsan xuduuda dagmada, ganacsigaadu uma qalmo deen cafis

## *Su'aalo ku saabsan cilada farsamo iyo taakulayn lagu xaliyo*

*Sideen u gudbistaa codsiga barnaamijka deeqaha lacageed anigoo kaashanayo ESO (Caawiyayaasha hore laygu hagay)?*

Deeqda ganacsiyada yar-yar ee Columbus-Franklin County COVID-19 waxaa lagu maamulaa qatka tikniyoolajiyadeed iyadoo lala kaashanayo Submittable. Marka ESO ka ku qaabilsan kulasoo xiriiro si aad u buuxsato codsigada, waxay kula wadaagi doonaan bogag loo yaqaano "Submittable" iska diiwaangalintiisuna waa bilaash adigoo sii tixraacaya Meesha ku qoran Create your account. Diiwaangalin kadib waxaa lagu warsan doonaa magacaada, iimaylkaada, iyo lambar sir kuu ah, diiwaangaling kadib waxaa buuxsandoontaa foomanki lagaa doonaye, waxaana kusoo dari kartaa qatka ESO kuu xilsaaran adigoo riixaya Meesha kore ee bidixda ku qoran Invite Collaborators si uu kaala shaqeeyo qatka, ugu dambeen markaad dhamaysato buuxinta foomanka waa gudbin ama diri doontaa cosigaado dhamaystiran adigoo taabanayo bagga Meesha ugu hoosaysa ee dhaxda ku aadan kunna qoran Submit.

*Waxaa i haysto cilad farsamo ku saabsan buuxinta cadsiga deeqaha lacageed, yaa la xiriiraa si aan u helo taageerid?*

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid iyo / ama aad la kulantid dhibaatooyin farsamo, fadlan dib ufiir macluumaadka si looxaliyo xaaladaada adigoo adeegsanayo qadkan: Submittable Help Center. Wixii su'aalo farsamo ee gaar ah fadlan la xiriir Kooxda Gudiga Taakulaynta Macaamiisha ee laga heli karo bogan: support@submittable.com.